

## Shaqo aan sharci ahayn? Waxaad leedahay xuquuq iyo qaan!

Hirgelinta xeerka ciqaabka yurubiyaanka wuxuu suurto-galinayaa shaqaalaha aan lahayn sharciga ciqaamada inay xuquuqdooda iyo qaan-sheegashadooda si fudud ay uga heli karaan dadka ama shirkadaha si sharci la'aan ah ajnabiga ugu shaqeeyaan oo ka faa'iida. Taasi waxaa kale oo ay quseysaa **magangalyo-doonka** iyo ajnabiga jaysta waraaqaha dul-qaadka, oo shaqeeya oo aan haysan waraaqaha fasaxa shaqada.

→ Waxaad xaq u leedahay **inaad shaqadaada musharkeeda aad heshid.**

→ Haddii uusan jirin heshiis cad oo idin dhexmaray adiga iyo shaqo bixiyahaaga, waxaad **xaq** u leedahay

· **Mushaharka ugu yar** (oo ku cad sharciga iyo heshiiska wadareed) ama

· **mushaharka caadiga u ah** ee shaqada la qabanaayo.

Si kastaba ha ahaatee waxaa lagu dhaqmayaa xeerka musharada ee Jarmalka.

→ Waxaa lagu xisaabtamayaa, in qanadaraaska shaqadaada inuu ugu yaraan **sedex** bilood socday, haddii adiga ama shaqo-bixiyahaaga wax kale aadan cadayn karin.

→ Haddii aad wadankaaga ku laabanaysid, shaqo-bixiyahaaga waa inuu bixiyo **kharashka ku baxaya xawilaada** mushaharkaaga.

→ Ma aha shaqo-bixiyahaaga tooska ah oo kaliya – wuxuu noqon karaa qandaraasle guud ama ganacsade dhexdhexaadiye ah!

## Waxaad sheegan kartaa xaquuqdaada!

→ Waa inaad **xuquuqda mushaharkaaga ku sheegataa** shaqo-bixiyahaaga . Haddii uusan bixin,qaantaada waad u dacwoon kartaa haddii aad ka guulaysatana qasab baa looga qaadayaa. Tallaabadan xitaa waxay suurtoagal tahay **kadib** markii aad **wadankaaga ku laabatid.**

→ Xitaa waa lagaa caawini karaa inaad mushaharkaaga aan lagu siin sheegato oo aad u dacwooto. Caawinadaan waxaa kharash la'aan kuu fidinaaya hay'ada ku qoran boggan gadaashiisa ama qareeno gaar ah oo ay kharashkooda dawladu bixin kari doonto.

→ Fadlan xusuusnoow, sheegashada qaanta mushaharka ee Jarmalka ay ku xadidan tahay iyo inay jiri karaan mudooyin kale oo xadidaada samayn sababaya.

## Waxaa lagu siin karaa sharciga ciqaamada!

→ Haddii aad ku shaqaynaysay **shuruudo gaar ah oo lagugu dhacayo** (xitaa adiga oo ah shaqaalaha shirkadaha saacdaha loogo shaqee-yo) ama haddii **aadan qaangaarin**, waxaad arji ku codsan kartaa sharciga ciqaamada oo muddo xadidan ah. Shuruudeedu waa, in

· Xeer ilaaliyaha ama maxkammadu ay rabto adiga inay markhaati ahaan kuu dhageeysato kiis dacwo ah oo lagu soo rogayo shaqo-bixiyahaaga dartiisa iyo

· Adiga inaad diyaar u tahay inaad markhaati ahaan wax sheegto.

→ Haddii ay sidaas wax noqdaan xafiiska ajnabiga waxay ku siin kartaa **muddo dheeraad ah ilaa inta aad ka safraysid**, si aad go'aan uga gaarto, inaad kiiska dacwada markhaati uga noqonaysid.

→ Fasaxa ciqaamada waa la dheerayn karaa ilaa iyo inta aad **mushaharkaaga ka helaysid**, haddii ay qaan-sheegashada mushaharkaaga dhibaato qaas ah dhalinayso inaad kasoo dalbatid meel jarmalka ka baxsan..

## Dhibaatooyin kusoo wajahaaya shqo-bixiyayaasha ka faa'iidaysata shaqooyinka sharci la'aanta ah

→ Haddii aad si sharci daro ah ugu shaqeeynayso shaqo-bixiyahaaga ka faa'iidaysanaaya shaqadaada waxaa lagu aadi karaa kiis dambi ah

→ Badanaa shaqo-bixiyuhu waa inuu bixiyo **kharashka dib u celinta** shaqaalaha.

→ Shaqo-bixiyaha waxuu ku qasban yahay inuu bixiyo lacagta canshuurta iyo lacagta loo shubo hay'adaha caymisyada bulshada kuwaa oo uu bixin laha haddii ay shaqadu tahay mid sharciyaysan.

→ Shaqo-bixiyaha waxaa laga muddo shan sanadood ah laga xanibikaraa taageerada ay bixiyaan dawlada, ururka midawga yurub iyo qandaraasyada bulshada. Waxaa lagu qasbi karaa inuu soo celiyo lacagtii uu helay.

## Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ilaalinta xaquuqda shaqaalaha waxaad ka heli kartaa bogga interneetka:

[www.ilo.org](http://www.ilo.org)

Das Faltblatt ist die Weiterentwicklung eines im ERF-Projekt ASAW erstellten Produkts.

## aan lagu dhicin oo lagu dhiig miiran!

Waxaad halkan kharash la'aan ka helaysaa ,  
Talobixin iyo tilmaamo:



Herausgeber: Caritasverband für die Diözese Osnabrück e.V.  
Dr. jur. Barbara Weiser & Stephan Kreftsiek  
Knappsbrink 58 - D 49080 Osnabrück  
Tel.: +49 (0)541 34978 - 218  
Fax: +49 (0)541 34978 - 4218  
bweiser@caritas-os.de  
Stand Januar 2019



**SHAQO  
AAN SHARCI LAHAYN?  
WAXAA JIRA XAQUUQ  
IYO QAANSHEEGASHO!**



**MACLUUMAAD LOOGU TALOGALAY  
MAGANGALYO-DOONKA IYO AJNABI-  
GA  
OO HAYSTA DULQAAD;  
OO XOOGA SHAQADOODA LA DHACO  
AY QUSEEYSO**

somali